


Caabuqa Korona SARS-CoV-2

Xeerarka iyo gargaarka



- Xeerka Caabuqa Karoona
- Fursadaha baaritaan
- Xeerarka Safarada
- [Talaalka München](#)
- Fursadaha caawimaad
- Warqad ku socota dadka, baaritaan kadib laga helo caabuqa Corona
- Warqad ku socota dadka xiriirka dhow la lahaa qofka Caabuqa ku dhacay



Xeerka Caabuqa Karoona ee München

Dowladaha ayaa go'aamisay qorshe si isdabajoog ah loogu dabcinayo xayiraadaha corona-ha.

Arrinta go'aan qaadashadu waa kororka oo kor dhaafa 35 iyo isbadelka heerka ilayska oo jaale ama casaan noqda.

Ilayska isbitaalka: Hadii in ka badan 1,200 oo bukaan qaba caabuqa COVID-19 la dhigo **isbitaallada** ku yaal Bayern 7-dii cisho ee u dambabay, "Heerka ilayska jaalah" ayaa la gaaray. Waxaa dhaqan gelaya tallaabooyin adag ee corona-ha, sida xirashada Af-xirk-FFP2 ama xayiraada xiriirka.

"Heerka ilayska cas" waxa la gaaray, marka in ka badan 600 oo qof oo qaba caabuqa Covid-19 ay galaan qeybaha daryeelka degdega ee Bayern. Haddii heerka ilaysku "casaan" noqdo, waxaa imankara tallaabooyin hor leh oo lagu sii adkaynayo corona-ha.

Fadlan si joogto ah u la soco heerka ilayska la gaaray iyo xeerkaka dhaqangelaya inaad raacdo.

Kororka 7-da cisho: Waxaa loo la jeedaa kororka caabuqa 'coronavirus-ka' ee 7-dii maalmood ee u dambaysay, 100,000-kii qof ee degaan ku nool.

Arrinta go'aan qaadashadu waa kororka oo kor dhaafa 35 iyo isbadelka heerka ilayska oo jaale ama casaan noqda.

Qiimaynta todobaadlaha ah ee xiligan caasimadda gobolka München waxaa laga heli karaa boggeeda rasmiga ah ee internetka.

www.muenchen.de/rathaus/Stadtinfos/Coronavirus-Fallzahlen.html

Macluumaadka muddada uu soconayo iyo xeerkaka dhaqangalka ah waxaad ka helaysaa Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka ee Bayern.

www.stmpg.bayern.de/coronavirus

Xeerka-3G

Xeerka 3G-ga ayaa goobo badan ka dhaqangalay. Taasi oo ka dhigan inay gelikaraan oo keliya dadka sida buuxda looga **tallaalay**, laga **baaray** ama ka **bogsaday** cudurka COVID-19.

Carruurta da'doodu ka yar tahay 6 sano iyo carruurta dugsiga ayaa laga reebay inay soo gudbiyaan cadayn baaritaan.

Dadka sida buuxda loo tallaaley ama bogsaday waa inay la yimaadaan caddaymo.

Dhammaan dadka kale waa inay la yimaadaan baaritaan antigen-ka oo degdeg aana ka badnayn 24 saacadood, is-baardin la korjoogteeyay, ama baaritaan PCR oo negatiif ah, kaasi oo aan ka badnayn 48 saacadood.

Waajibaadka af-xirka

Af-xirka qalliinka ayaa caado noqonaya.

Hawada furan ayaan Af-xirkku waajib ahayn.

Isticmaalka gaadiidka dadweynaha iyo xarumaha gudahooda ayaa Af-xirkku waajib yahay. Hoyga gaarka ah ayaanu Af-xirkku waajib ahayn.

Dadka saboolka ah, waxaa la siinayaa af-xir. Fadlan kala xiriir hoygaaga ama waydii xarunta bulshada (Sozialbürgerhaus).

Booqashada guryaha waayeelka iyo kuwa daryeelka

Soo-boqdayaashu waa inay xidhaan **Af-xir**.

Waa muhiim in kaarka tallaalka la soo bandhigi karo wakhti kasta.

Wehelka iyo taageerada dadka dhimanaya xili kasta waa la ogol yaha.

Meheradaha iyo Beeraha Biirka

München waxaa xiligan ka dhaqangalay xeerkaka uu kororku „ka hooseeyo 50“.

Meheradaha cuntada ayaa baaritaan la'aan martida dib ugu furi kara gudaha iyo dibadaba.

Xarumaha gudahooda waxa ka dhaqangalay xeerk-3G marka kororka 7-da maalmood 35 kor u dhaafo: Waxaana geli kara Dadka la tallaalay, kuwa bogsaday ama kuwa la baaray.

Ardayda ayaa loo tixgeliyaa baaritaanada joogtada ah ee dugsiga.

Waxaa muhiim ah, in xili walba lala yimaado kaarka tallaalka ama cadayn baritaan.

Xanaanada carruurta, Dugsiyada iyo Jaamacadaha

Xarumaha xanaanada: Goobaha xanaanada iyo xarumaha xanaano-maalmeedka (Kita) ayaa furan iyaga oo la marayo baaritaan joogta ah.

Dugsiyada: Toddobaadyada ugu horreeya, Af-xirka ayaa waajib ku ah xayndaabka dugsiga, sidoo kale fadhiga ama goobta shaqao ee fasalka dhediisa, si looga hortago caabuqa dadka safarka ka soo noqonaya.

Casharada tooska ah ayaa sii soconaya, haddii kororku kor u dhaafu 35.

Waxaa waajib ah, shuruudaha baaritaanka, afxirka iyo xeerka maasaafada ee 1.5 mitir.

Dhammaan dugsiyada kale iyo fasalada kala duwan. Waxay wax ku baaranayaan fogaan arag.

Baaritaanka ayaa sidoo kale lagu qaadi karaa Skuulada.

Maclumaadka ugu dambeeyaa ee ku saabsan habsami u socodka iskuulada iyo kororka hadda jira waxaa laga heli karaa Degelka internetka ee magaalada München:

www.muenchen.de/rathaus/Stadtverwaltung/_Referat-fuer-Gesundheit-und-Umwelt/_Infektionsschutz/Neuartiges_Coronavirus.html#Schule

Wasaaradda Waxbarashada Dhaqanka ee Bayern waxay kuu diyaarisay maclumaad guud oo ku saabsan furnaashaha iskuulada ee 2021/2022 kuwaasi oo luuqado kala duwan ku qoran.

www.km.bayern.de/allgemein/meldung/7011/informationen-zum-schuljahr-202021-in-anderen-sprachen.html

Jaamacadaha ayaa loo ogolyaha casharo fool-ka-fool ah.

Waxaa waajib ah, shuruudaha baaritaanka, afxirka iyo xeerka maasaafada ee 1.5 mitir.

Iskuulada muusigga ayaa furan.

Dugsiyada barashada wadista ayaa furan.

Waxbarashada internetka ayaana suuragal ah.

Xarunta waxbarashada dadka waaweyn ee München ayaa casharro bixin toos ah bixinaysa.

Munaasabada iyo xilliga firaaqada

Xarumaha gudahooda waxa ka dhaqangalay xeerka-3G marka kororka 7-da maalmood 35 kor u dhaafu: Wuxaana geli kara Dadka la tallaalay, kuwa bogsaday ama kuwa la baaray.

Ardayda ayaa loo tixgeliyaa baaritaanada joogtada ah ee dugsiga.

• **Cibaadada:** dhamaan diimaha oo idil ayaa loo ogolyahay.

Hadii xeerka-3G aan la tixgelinkarin (Gelitaanka keliya dadka la tallaalay, kuwa bogsaday ama la baaray):

Ilaali masaafada dadka kale ugu yaraan 1.5 mitir. Xidho af-xir.

Xitaa marka aad fadhidid!

• **Kulamada Dhaqanka:** Xeerka-3G ma khuseeyo munaasabada ay hawadu furantahay ilaa 1,000 qof. Munaasabada dadku ka badanyahay 1,000 qof, ayaa saamaynaya xeerka-3G gudaha iyo dibaddaba, iyadoo aan loo eegin kororka. Dadka la tallaalay, kuwa bogsaday ama la baaray oo kali ah ayaa loo oggol yahay inay ka qaybgalaan.

• **Xarumaha dhaqanka:** Madxfayada, tiyaatarada, hoolalka riwaayadda, shineemooyinka, goobaha xusuusta, kaydka iyo maktabadaha ayaa xeerka-3G uu saamaynaya kolka kororka 7-da maalmood uu 35 kor u dhaafu.

• **Goobaha xiliga firaaqada:** Waxaa xiligan la furay xadiiqooyinka xayawaanka, jardiinooyinka, garoomada lagu ciyaaro, goobaha jirdhisika, garoomada gudaha, goobaha dabaasha, barkadaha dabaasha ee hudheellada, xarumaha caafimaadka, sawnada iyo solarium-ka ayaa hadda furan.

Meheradaha lagu ciyaaro khamaarka iyo goobaha sharadka ayaa sidoo kale furan. Xeerka-3G ayaa ka shaqaynaya qolalka xiran.

• **Goobaha isboortiga:** Cayaarahaa madadaalada ee dibedda ayaa la oggol yahay iyada oo aan la xadiidnay tirada kooxda, baaritaan qasab ahina aanu jirin.

• **Munaasabada hawadu u furantahay:**

Kulamada isboortiga iyo dhacdooyinka kale ee waaweyn ee hawada furan ayay suurtgal tahay ilaa 25,000 oo qof iyadoo la raacayo xeerka-3G.

• **Gaadiidka dadweynaha:** Shuruudaha Af-xirka ayaa ka dhaqangelaya, balse ma jirayo xeerka-3G.

- **Dalxiiska:** Habeen dhaxa dalxiiska ah, ayaa magaalada München dib loogu oglaaday. Xeerka-3G wuxuu khuseeyaa imaanshaha iyo 72-da saac ee ka dambeeyaa. Dalxiiska iyo dalxiisyada la hago ayaa sidoo kale la oggol yahay.
- **Cawaysyada iyo diskoooyada:** ayaa la filayaa in Bisha Oktoobar la furo.
- **Carwooyinka:** waxaa sii soconaya xeerka 3G-Regel iyo af-xirka.
- **Kulamadaa iyo shirarka:** Ilaa 5,000 oo ka qaybgalayaal ah, iyada oo loo hogaaansamayo xafidaada iyo qorshaha nadaafadda ayaa la qabankaraa.

Macluumaad dheeri ah waxaad ka dhelaysaa Wasaarada Arimaha gudaha ee Bayern.

www.corona-katastrophenschutz.bayern.de

Dukaamada iyo Meheradaha adeega

Meheradaha ayaa si joogto ah u furan. Af-xirka ayaana waajib ah dukaamada.

Meheradaha adeega, gaar ahaan daryeelka jirka ayaa dib loo furay.

Balse waxaa sii soconaya xeerka 3G-Regel.

Inta Xafiisyada **maamulka magaalada München** ayaa inta badan la heli karaa. Xarumahan waa inaad had iyo jeer xidhataa Afg-xirka kugu habboon. Ilaali masaafadadadka kale ee ugu yaraan 1.5 mitir. Si looga badbaado infekshinka, waa in xarumaha laga ilaaliyaa dadka badan.



Abka kaaga digaya Kanoonaha (Corona-Warn-App) wuxuu si dhaqso leh oo qarsoodi ah kugu wargelinaya, hadii aad ku dhowaatay qof cudurka qaba.

Abkani waa lacag la'aan waxaadna ka heli karaysaa App Store-ka iyo Google Play-ga.

Fursadaha tijaabada ah / Kulanka qof cudurka qaaday

Haddii aad boooqato xafiiska dhakhtarka ama goobaha kale ee baaritaanka, waa inaad xirataa Af-xirka FFP2. Lilaali masaafada dadka kale ee ugu yaraan 1.5 mitir.

Waxyaabaha aad u baahan tahay inaad ka ogaato baaritaanka caabuqa-corona ee magaalada Munich:

- **In aad xarumaha dhakhaatiirta ayaa** isaga baarto Caabuqa-corona ayaa suurtagal ah. Dadka ay ka muuqato astaamaha (calaamadaha jirrada) sida qandhada, qufaca, iyo neefta oo gaabata waxay heli karaan baaritaan dhaqtarkooda. Baaritaanka ayaa waxa sidoo kale helaya dadka aan caymiska caafimaadka lahayn. Waa inaad hore balan taleefan uga qabsatid. Kadib waxaad aadi kartaa xarunta dhakhtarka. Ha iloobin Af-xirka FFP2 iyo kaarka caafimaadka! Xarumaha dhakhaatiirta waxaad ka heli kartaa internetka ee „Arztsuche für Coronavirus-Test“. <https://dienste.kvb.de/arztsuche/app/suchergebnisse.htm?hashwert=a126d5d04b692b87be6ccbe3b2717826&lat=48.1351253&lng=11.5819805&zeigeKarte=true>

- **Haddii App-ka digniinta ee Corona** uu muujiyo „koror halista“ ee casaanka, fadlan balan taleefan ka sameyso takhtarkaaga.

- **Goobta baarida ee caasimadda gobolka Munich** Theresienwiese waxay bixisaan baaritaan Caabuqa-corona kaas oo aad heli karto adiga oo aan ka dagin gaarigaaaga („Drive-through“). Baaritaanada dadka reer Munich waa u lacag la'aan. Soo qado Af-xir iyo kaarkaaga caafimaadka, haddii aad leedahay.

Fadlan booqo xarunta baaritaanka kaliya, ka dib marka aad ballan ka sameysato. Ballanta waxaa lagugu xaqiijin doonaa SMS iyo emayl laguu soo dirayo. Geli lambarkaaga mobiilkha ah kuna soo hagaaji emaylkaaga gaarka ah ciinwaankaaga Internat. www.corona-testung.de

- „**Xarunta-heeganka ee cudurka**“ ayaa sidoo kale ku taala Theresienwiese (barxadda maamulka, Matthias-Pschorr-Straße 4). Bukaanku ayaa iman kara iyaga oo aan ballan qabsan. Soo qado Af-xirka FFP2 iyo kaarkaaga caafimaadka, haddii aad leedahay.

Toddobo maalmood usbuucii ayuu furan yahay: Isniinta, Talaadada iyo Khamiista laga bilaabo 6 subaxnimo ilaa 9 fiidnimo.

Arbacada iyo jimcaha laga bilaabo 4 subaxnimo ilaa 9 fiidnimo.

Sabtida, Axadda iyo ciidaha dadweynaha laga bilaabo 10-ka sub. ilaa 9-ka fiid.

- **Tijaabinta degdega ah:** Ka qayb ahaan waxa loogu yeero „tijaabada muwaaddiniinta“, qof walba waxaa uu si bilaash ah ugu yaraan hal mar todobaadkii u sameyn karaa tijaabada deg dega ah ee antigen-ka.

Tijaabooyinkaan deg dega ah waxaa laga helikaraa farmashiyayaasha iyo xarumaha baaritaanka gaarka loo leeyahay ee loogu talagalay.

Goobaha aad tijaabada deg dega ah ku samayn karto, waxaad ka heli kartaa halkan:

www.testen-muenchen.de

Seerarka natijjada baaritaanka Boosatiifka ah

Haddii ay kuu soo baxdo natijo bosatiif ah, waa inaad isla markiiba gashaa go'doon (karantiil) oo aad samaysaa baaritaanka PCR. Isla markiiba aad ballana sameysataa.

Karantiilintu waxa kaliya uu ku dhammaanayaan ogaanshaha natijjada baaritaanka PCR-ka ee negatifka. Haddii tijaabadi sidoo kale ay tahay mid boosatiif ah, waa inaad isla markiiba wargelisaa waaxda caafimaadka.

Xiriirka Waaxda caafimaadka:

Tel. 089 233 96333

Emayl: infektionsschutz.gsr@muenchen.de

Hadii uu xiriir idin dhemaro qof cudurka qaba (KP1), waa inaad karantiil gashaa mudo 14 maalmood ah. Si loo joojiyo karantiilka, waa inaad muujisaa natijo baaritaan negatif ah.



Xeerarka safarka

Fadlan ilaali, shuruucda iyo waajibaadka marka aad Jarmalka ka soo gasho dalalka halista ah ama degaanada caabuqa gaarka ah leh.

Liiska dalalka halista ah internetka ayaa laga heli karaa. www.rki.de/DE/Content/InfAZ/N/Neuartiges_Coronavirus/Risikogebiete_neu.html

- Laga soo bilaabo Ogosto 1, 2021, dhammaan dadka safraya ee da'doodu 12 jir ka weyn tahay waa inay la yimaadaan Cadayn baaritaan, marka ay soo galayaan Jarmalka, haddii la tallaalay ama ay bogsadeen mooyaane.

Shuruudda baaritaanka ayaa ilaa iyo hada waxa kaliya oo lagu dabaqay dadka ku safarka diyaaradaha. Hadda waxay sidoo kale waajib ku tahay safarka tareenka, baska, markabka iyo gaadiidka gaarka loo leeyahay, sida baabuurka.

- Haddii aad ka soo laabato dal halistu sarayso, waa inaad internetka ka buuxisaa foomka gelitaanka safarkaaga ka hor. Kadib waxaad heli doontaa dukumiinti xaqijinaya (PDF). Waxaad ku buuxin kartaa foomka khadka Internetka. www.einreiseanmeldung.de/#/register

- Waxaa xeer sii ahaanaya: Haddii aad ka soo noqoto degaan halistiisu sarayso, in aad karantiil gasho ilaa 5 cisho. Karantiilkku wuxuu dhamaanayaa, marka ay tijaabo hor lehi negatiif noqoto 5-ta cisho ka dib. Sidoo kale haddii lagu tallaalay ama aad bogsatay, waa inaad keentaa cadaynta baaritaan cusub oo aad buuxisaa foomka gelitaanka. Marka ayaa 5-ta maalmood ee karantiilkku dhamaanayaa.

Ku dir cadayntaada baritaanka iimay ahaan: corona-einreisende.gsr@muenchen.de

Haddii aad ku sugnayd **degaan halistiisu ama kororkiisu aad u sarreeyo**, emayl ahaan ku dir cadaynta baaritaanka.

corona-einreisende.gsr@muenchen.de

- Haddii aad ka soo safartay degaanada uu saameeyay caabuqa gaarka ah, waa inaad isla markiiba karantiil ku noqotaa gurigaaga muddo 14 maalmood ah. Suuragal ma aha in la soo koobo karantiilkka. Haddii aad ka timid degaan uu saameeyay caabuqa gaarka ah ah, fadlan ku soo dir shahaadada baaritaanka emayl ahaan: virusvarianten-gebierte.gsr@muenchen.de

- Xaaladaha qaarkood waxaa jira waxyabo ka reeban shuruudaha karantiilkka. Wasaaradda Caafimaadka ee Federaalka waxay ku siinaysaa maclumaad arrintan ku saabsan oo luqado badan ah. www.bundesgesundheitsministerium.de/coronavirus-infos-reisende/merkblatt-dea.html

- Wixii faahfaain ah ee intaasi dheer, waxaad ka heli kartaa Robert Koch-Institut (RKI). www.rki.de/DE/Content/InfAZ/N/Neuartiges_Coronavirus/Risikogebiete_neu.html

"Safarada kooban ee xadka"

Dadka, wax ka yar 24 saacadood ku nagaada degaan khatartiisu sarayso ama ku soo noqoda dalka Jarmalka wax ka yar 24 saacadood, waajib kuma aha karantiilkku.

Si kastaba, qof kasta oo ku negaada 10 maalmood degaan ay ka jiraan noocyada kala duwan ee fayraska, waa waajib inuu karantiil galo.

Xeerka dadka si buuxda loo tallaalay

Dadka ugu yaraan 15 maalmood ka hor, si buuxda lu qaataay tallalka Corona-ha eel laga oggolaaday Midowga Yurub, lama karantiilayo, hadii ay ku sugnaayeen degaan halista. Balse, waa inaad haysataa caddeyn tallaal oo af Järmal, Ingiriis ama Faransiis ku qoran.

Isla sidaas oo kale ayaa lagu qiimaynayaa dadka si dhab ah ah looga helay cudurka 'SARS-CoV-2' ama kuwa u xanuunsaday (baaritaanka PCR-ga positiifka ah) oo si buuxda u bogsaday. Ansaxnimada baaritaanka PCR-da ee boositiifka ah, wuxuu bilaabmayaa 28 maalmood ka dib baaritaanka, wuxuuna dhamaanayaa 6 bilood ka dib taariikhda baaritaanka. Intaas ka dib, 1 tallaal oo kali ah ayaa loo baahan yahay, si loo tixgeliyo in si buuxda loo tallaalay.

Ka-reebitaankani wuxuu khuseeyaa oo keliya haddii iyo inta qofka uusan muujin wax astaamo ah oo tilmaamaya infakshinka SARS-CoV-2 ayna had iyo jeer wataan kaarkooda tallalka

Ka dib joogitaanka degaanada caabuqa kala duwan leh, ma shaqaynayo sharciga ka reebayaa dadka la tallaalay.

Talaalka München

Talaalku waa ikhyaar, waana lacag la'aan.

München waxaa ka jira fursado badan oo la isku talaali karto, xarunta talaalka, ololaha talaalka, dhakhaatiirta gaarka ah, dhakhaatiirta caruurta ama dhakhaatiirta shirkadaha shaqada.

Fadlan talaalka la imaw kaar aqoonsiga ama baasaboor ansax ah. Haddii aad leedahay, fadlan sidoo kale soo qaado kaarka jaalaha ah ee tallaalka.

Haddii aad qabtid xanuun gaar ah, fadlan soo qaado xogta dhakhtarka, hadii aad haysato.

Qof kasta oo 16 sano ka weyn oo ku nool Jarmalka wuxuu qaadan karaa tallaalada la ansixiyay.

BioNTech, Moderna iyo AstraZeneca waxay u baahan yihiin laba tallaal, kuwaas oo lagu samayn karo xarunta tallaalka iyo inta uu socdo dhammaan ololaha tallaalka.

Si kastaba ha ahaatee, waa inaad dhawrtaa mudada u dhexeeya talaalka hore:

- BioNTech 3 toddobaad,
- Moderna 4 toddobaad,
- AstraZeneca tallaalka iskwaydaaranaya ee talaalka mRNA 4 toddobaad.

Tallaalka labaad, waa inaad la timaadaa tixraaca tallaalka koowaad (kaarka talaalka jaalaha ah ama cadaynta tallaalka).

Waxaad sidoo kale qaadan kartaa talaalka Johnson & Johnson. Waxaad u baahan tahay hal tallaal oo kaliya. Tallaalka Johnson & Johnson waxaa kaliya oo loo oggolyahay da'da 18 jir ka weyn.

Talaalka iyo xarumaha tallaalka

Waxaad iska tallaali kartaa xarunta tallaalka ee Riem Isniinta ilaa Axadda laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 5.45 galabnimo. Xitaa adiga oo aan ballan tallaal haysan ama aan hore looga diiwaangelin bogga tallaalka

Hase yeesh, way ka dhakhso badan tahay kolka aad iska diiwaangeliso bogga tallaalka:
<https://impfzentren.bayern/citizen/>

Fadlan raadso qof si fiican ugu hadla afka Jarmalka si uu diwaangelinta kaaga caawiyo.

Waxaad sidoo kale ballan ka qabsan kartaa telefoonka: 089 90 429 2222

Talaalka qoysaska ee xarumaha tallaalka

Xarunta tallaalka ee Riem waxay qoysaska siisaa talaal maalinle ah, laga bilaabo 9 subaxnimo ilaa 5.45 galabnimo. Adeegan ayaa loogu talagalay carruurta iyo dhallinyarada da'doodu tahay 12 ama ka weyn iyo waalidkood. Wuxaan heli kartaa talooyin caafimaad oo faahfaahsan. Muhiim ma aha in hore ballan looga qabsado.

Sideen ku tagi karaa xarunta tallaalka?

Xarunta tallaalku waxay ku taallaa Xarunta Bandhigga ee München, Paul-Henri-Spaak-Straße, ee bandhiga C3 ([ilinka Waqooyi-Irida 17](#)).

Waxaad ku imankartaa sida soo socota:

Gaariga: Autobahn A 94, isgoyska 5 "München-Riem", oo leh calaamadda "Impfzentrum", hore u sii aad Paul-Henri-Spaak-Straße [ilinka woqooyi ee xarunta bandhigga](#) (marinka laga galo iridda 17). Goobo ku filan oo gawaarida la dhigto ayaa la heli karaa.

Gaadiidka dadweynaha: Tareenka dhulka hoostiisa mara U2 raac ilaa Messestadt West ama Messestadt Ost. Halkaas waxaad ka heli kartaa adeegga baska MVG ee bilaashka ah (khadka gaarka ah 99) xarunta tallaalka. Adeeggan waxaa la helaa 6 ilaa 7 daqiqo kasta inta u dhaxaysa 7.30 a.m. iyo 7.30 p.m. Waxaad ka heli kartaa macluumaa intaa dheer jadwalka internetka ah www.mvg.de

Oole tallaal oo ka socda magaalada oo idil

Gebi ahaan magaalada oo idil waxaa ka socda Ololaha tallaalka. Tallaalku waa lacag la'aan. Uma baahnid ballan. Waa inaad tagtaa oo kaliya. Qof kasta oo ka weyn 16 sano oo ku nool Jarmalka waa is tallaali karaa.

Fadlan talaalka u soo qaado kaarka aqoonsiga ama baasaboor shaqeeynaya. Dhammaan tallaalada la ansixiyay ayaa la filayaa in la heli karo. Tallaalka ka dib waxaad heli doontaa shahaadada tallaalka oo leh lambarka QR ee shahaadada tallaalka dhijitaalka ah ee taleefanada casriga ah.

Dhammaan balamada iyo goobaha waxaad ka heli kartaa halkan:
www.muenchen.de/rathaus/Stadtverwaltung/
Referat-fuer-Gesundheit-und-Umwelt/
[Infektionsschutz/Neuartiges Coronaviruse.html#Termine](http://Infektionsschutz/Neuartiges_Coronavirus.html#Termine)

Caddaynta dhijitaalka ah ee tallaalka

Tallaalka kadib isla markaaba, xarunta tallaalka ee München waxay soo saartaa shahaadada tallaalka dhijitaalka ah. Shahaadooyinka tallaalka dhijitaalka ah waxaa lagu daabacay xarunta tallaalka iyagoo ah lambar QR ayaa la bixinaya.

Koodhka QR Moobaylka ayaa lagu la soo degayaa barnaamijka Digniinta-Corona (Corona-Warn-App) ama barnaamijka (CovPass).

Dadka hore xarunta tallaalka ugu qaataj talaal dhamaystiran, waxay kala soo degi karaan caddayntooda dijitaalka koontadooda xarunta tallaalka ee Bayern waxayna ka daalacan karaan lambarka QR-ka barnaamijka digniinta Corona (Corona-Warn-App) ama barnaamijka CovPass. impfzentren.bayern

Dhanka kale, dadka si buuxda loo tallaalay waxay sidoo kale ka heli karaan shahaadadooda tallaalka dhijitaalka ah farmasiyada. Wuxuu ku heli doontaa lacag la'an marka aad soo bandhigto kaarka jaalah ah ama shahaadooyinka tallaalka ee xarumaha tallaalka.

Mareegta farmasiyaha ayaad ka helaysaa, farmashiyayaasha bixinaya shahaadada tallaalka ee dhijitaalka ah: mein-apothekenmanager.de

Ka sokow kaarka dhijitaalka ah ama caddeyn taallalka ee xarunta tallaalka, kaarka tallaalka ee jaalah ah ayaa dabcan weli caddeyn ansax ah u noqonaya tallaalka korona.

Maclumaad dheeriga ah ee Internetka: digitaler-impfnachweis-app.de

Haddii aad qabto xanuuno kale, fadlan soo qaado dokumentiyada dhakhtar haddii aad hayso.

Maclumaadka dalka oo idil ee tallaalka

Maclumaadka xiligan ee ku saabsan tallaalka COVID-19 ee tallaalka mRNA waxaa luuqado badan looga heli karaa machadka Robert Koch-Institut (RKI).

www.rki.de/DE/Content/Infekt/Impfen/Materialien/COVID-19-Aufklaerungsbogen-Tab.html

Wasaaradda Caafimaadka iyo Daryeelka ee Gobolka ayaa bixinaysa maclumaad ku saabsan istaraatijiyadda tallaalka ee Gobolka madaxabanaan ee Bayern.

www.stmpgp.bayern.de/coronavirus/haeufig-gestellte-fragen/#Schnellsuche

Wakiilka Dowladda Federaalka u qaabilisan arimaha Socdaalka, Qaxootiga iyo ls-dhexgalku waxay ku siineysaa maclumaad ku saabsan cudurka loo yaqaan 'coronavirus' iyo ka hortagga tallaalka oo ku qoran 22 luqadood.

www.integrationsbeauftragte.de/ib-de/staatsministerin/corona

Barnaamijka „aidminutes.rescue (COVID-19)“ wuxuu ku siinaya maclumaad dhijitaalka ah ee tallaalka in ka badan 35 luqadood.

Abka waxaa laga heli karaa bilaash App Store iyo Google Play

<https://play.google.com/store/apps/details?id=com.aidminutes.rescue.covid19>

<https://apps.apple.com/de/app/aidminutes-rescue-covid-19/id1507581865>

Macluumaad iyo caawimaad

Macluumaad ku saabsan coronavirus

Waaxda caafimaadka ee Munich (Gesundheitsamt München)

Macluumaadka khadka tooska ah ee luqado badan:
muenchen.de/corona

Khadka adeegga Corona ee magaalada Munich (Servicehotline Corona)

Macluumaadka taleefanka: 089 23396333

Isbahaysiga COVID – Macluumaadka onlaynka ah ee luuqadaha kala duwan

Macluumaad ku saabsan coronavirus-ka ee la
soo degsado iyo Pocket Guides ee taleefannada
Smartphones-ka ah oo ku qoran in ka badan
30 luqadood: www.COVID-Information.org

Xarunta Caafimaadka ee Qoomiyadaha (EMZ e.V.)

Talooyinka ka hortaga isku buuqa qoyska ee xaalada
maalinlaha ah ee koorona oo 26 luqadood ku qoran:
<https://mimi-gegen-gewalt.info-data.info/>

Xarunta Federaalka ee Caafimaadka (BZgA)

Macluumaadka ku saabsan coronavirus iyo cudurka
COVID-19 oo ku qoran luqado badan. Degelka:
infektionsschutz.de/coronavirus/materialienmedien/informationen-in-anderen-sprachen.html

Fursadaha gargaar

Adeegga Dhibaatooyinka Maskaxda ee Bayernta-sare (Krisendienst Psychiatrie)

Caawinta dhibaatooyinka maskaxda ee dadka ay
dhibaatadu saameysey iyo ethelkooda. Kharashka
ugu badan waa 0.60 euro wicitaankiiba. Waxaa laga
heli karaa 24 saac. Tel. 0180 6553000

Isar Amper Clinic, Isbitaalka Bari ee Munich (Klinikum München Ost)

Dadka u baahan inay aadaan cisbitaalka dhimirka.
Ballanta telefoonka: 089 45620
Degelka: kbo-iak.de/index.php?fs=0

La talinta taleefanka (Telefonseelsorge)

Welwelka, dhibaatooyinka, ama fikradaha isdilka?
La taliyayaasha taleefanka ayaa ku dhageysanaya.
Tel. 0800 1110111 – Tel. 0800 1110222
Sidoo kale waxaad u qori kartaa emayl ama waxaad
isticmaali kartaa sheeko. Diiwaangelinta internetka:
online.telefonseelsorge.de
Worbixin ku saabsan talobixinta luuqadaha kale:
telefonseelsorge.de/international-helplines/

Jasiirada Munich (Münchener Insel)

Dhibaatooyinka iyo la-talinta nolosha ee taleefanka
af Jarmal iyo Ingiriis, sidoo kale si qarsoodi ah.
Talabixinta fiidiyowga sidoo kale waxaa suurtagal ah
laga bilaabo bartamaha Janaayo 2021. Xaaladaha
degdegga ah, ballan ayaa lagu samayn karaa
goobta. Tel. 089 220041 – Tel. 089 21021848

Caawinta taleefanka ee tacadiga ka dhanka ah haweenka (Hilfetelefon für Frauen)

Caawinta haweenka la kulma dhibaatooyinka
tacadiga. La-taliyayaashu sidoo kale waxay gacan
ka geystaan sidii haweenku u heli lahaa gabbaad.
Talo bilaash ah oo 17 luqadood. Ayaa la heli karaa
24 saacadood. Tel. 08000 116 016
Degelka: hilfetelefon.de/das-hilfetelefon.html

Xarunta caawinta murugada e.V. (THZM)

Caawimaada waayo-aragnimada xun. Koorsoooyinka
waxaad ku baranaysaa, in aad sifiican u la noolaatid
khibrada xun. Diiwaangelinta internetka: thzm.de/ressourcenorientierte-stabilisierungsgruppen/

Refugio Munich – Caawinta carruurta, dhalinyarada iyo dadka waaweyn

Caawinta carruurta, dhalinyarada iyo dadka
waaweyn ee ka qaxay dalkooda hooyo. Waxyaabaha
la bixiyo: Daaweynta cilminafsiga, taageerada inta
lagu gudajiro howlaha magangalyada iyo diyaarinta
koorsooyin luuqadeed. Taageero ku saabsan
helitaanka shaqo, tababar ama guri.
Tel. 089 982957 0
Degelka: www.refugio-muenchen.de

Adeegga cilmi nafsiga ee Caritas ee loogu talagalay ajaanibta (CARITAS)

La-taliye af-hooyo oo bilaash ah la-talinta
muhaajiriinta ka yimaada Talyaaniga, Griiga,
Isbaanishka, Boortaqiiska, Latin Ameerika,
Kroshiya, Seerbiya, Bosnia, Ruushka iyo Turkiga.
Waxay bixisaa su'aalaha ku saabsan barbaarinta,
iskaashiga, kala tagga iyo furitaanka. Sidoo kale la
talinta cilmu-nafsiga bulshada iyo la talinta nolosha.
Talada taleefanka ama khadka tooska ah.

Tel. 089 2311490

E-Mail: pds@caritasmuenchen.de

Adeegga Cilmi-nafsiya ee Arbeiterwohlfahrt Munich (AWO München)

Talo-bixin bilaash ah oo dhakhaatiirta cilminafsiga ee Bosnian, Croatian, Serbian iyo Turkish. La talinta shaqsiyed iyo kooxeed waxaa laga bixiyaa su'aalaha ku saabsan barbaarinta, guurka, qoyska iyo xaaladaha dhibaatooyinka shaqsiyed. Macluumaadka ku saabsan dalabyada iyo qoraallo ku qoran luqado badan:

E-Mail: psych.migration@awo-muenchen.de

Degelka: [awo-muenchen.de/migration/
psychologischer-dienst](http://awo-muenchen.de/migration/psychologischer-dienst)

Donna Mobile – Talada haweenka, qoysaska, carruurta iyo dhalinyarada

Talada haweenka, qoysaska, carruurta iyo dhalinyarada ee la xiriirta arrimaha caafimaadka iyo shaqada muhaajiriinta (sidoo kale taleefan):

- La-talin-bulsho oo af Jarmal iyo Turki ah.
- La-talinta cilmu-nafsiya ah, tusaale ahaan shaqsi, lamaane iyo teraabiyada qoysaska ee af Jarmal, Polish, Hangari, Ruush, Isbaanish, Griig, Bulgaariya, Talyaani iyo Ingiriis.

• Talo-siinta caafimaad oo Jarmal iyo Turki ah.

Tel. 089 505005

Degelka: donnamobile.org

Dhakhaatiirta Adduunka e.V. – open.med (Ärzte der Welt e.V.)

Gargaar caafimaad iyo talobixinta bulsho ee dadka aan layhayn caymis caafimaad. Ballanta waxaad qabsan kartaa 9:30 subaxnimo ilaa 5:00 galabnimo. Ph. 0177 5116965

Degelka: [aerztederwelt.org/wem-wir-beistehen/
hilfe-fuer-patientinnen](http://aerztederwelt.org/wem-wir-beistehen/hilfe-fuer-patientinnen)

Cinwaanada:

- Dachauer Str. 161, 80636 München.
- Behandlungsbus am Hauptbahnhof, Eingang Nord, Arnulfstr. 1-3., 80335 München.
- Bayernkaserne, Haus 12, Heidemannstr. 50. 80335 München.

Malteser Medicine dadka aan caymiska caafimaadka lahayn (Malteser Hilfsdienst)

Dadka aan lahayn caymiska caafimaadka waxay daaweyn ka heli karaan dhakhaatiirta ama xirfadlayaasha caafimaadka. Tusaale ahaan xaaladaha degdegga ah, dhaawacyada, urka. Waxaa jira dhakhaatiirta carruurta, dhakhaatiirta ilkaha, dhakhaatiirta guud iyo saacad la-talin haweenka ah.

Fadlan ballan qabso: Tel. 089 43608411

Cinwaanka: Streifeldstr. 1, 81673 München [malteser.de/fileadmin/Files_sites/Fachbereiche/
Migranten-Medizin/Downloads/Flyer_MMM.pdf](http://malteser.de/fileadmin/Files_sites/Fachbereiche/Migranten-Medizin/Downloads/Flyer_MMM.pdf)

Refugee Stairway ee ergeda Gudaha (Diakonie München, Innere Mission)

Caawinaad si looga faa'iideysto deeqaha is dhiegalka, tusaale ahaan, markaad laxiriirto xarumaha takhasuska leh, xarumaha qaabiliaada iyo guryaha la wada deganyahay.

Bakan qabso: 089 1269915102,

E-Mail: rsc@im-muenchen.de

Bukaan socod eegtada cilmu-maskaxda Jaamacadda Munich (LMU Migrationsambulanz)

Caawinta dadka soo haajiray ee qaba dhibaatooyinka maskaxda iyo cudurrada maskaxda. Talo-bixin ayaa lagu heli karaa luqado kala duwan.

La daaweyyo:

- Niyad jab, waalli, maskaxda
- Murugada ka dib dhibaatada
- Dhibaatooyinka hagaajinta iyo cilladaha walaaca
- Xanuunada Balwadaha

Balan qabsi: Tel. 089 440053307

E-Mail:

Migrationsambulanz.LMU@med.uni-muenchen.de

Cinwaanka: Nussbaumstr. 7, 80336 München:

IN VIA KOFIZA

Waxyaabaha la bixiyo, waxqabadyada, dhacdooyinka iyo caawimaadda maamulka. Haweenka soo galootiga ah ee jira 18 iyo wixii ka weyn Afrika, Aasiya, Yurub iyo Latin Amerika. Haweenka oo dhanaya talo la siyyaa, iyadoon loo eegin jinsiyadooda, diintooda iyo afkooda.

Tel. 089 5488895 0

E-Mail: kofiza@invia-muenchen.de

Dhambaalada iyo macluumaaadka bukaanka ee ka imanaya caasimada München

Adeegga Bulshada ee Haweenka Katooliga ah (SkF)

Taageerada iyo la talinta haweenka u baahan, talo siinta (aan qaan gaarin) haweenka uurka leh, qoysaska da'da yar, guryaha hooyada iyo dhallaanka iyo hoyga haweenka guri la'aantu hayso.

Tel. 089 55981 0

Degelka: skf-muenchen.de/

Ururka Daryeelka Ragga ee Kaatooliga ah (KMFV e.V.)

Caawinaad iyo talobixin shaqsiyeed oo ku saabsan hoy la'aanta, qabatinka, dembi la'aanta iyo shaqo la'aanta.

Degelka: kmfv.de/einrichtungen-und-dienste/einrichtungssuche/index.html

DIE ARCHE – Talo siinta halista is-dilka

Talo ku socota dhalinyarada iyo dadka waaweyn ee nolosha la qabsan karin, ee aan dooneyn inay sii noolaadaan. Lataliyeasha ARCHE waxay dadka ka caawiyaan fikradaha is dilka iyaga iyo eheladooda.

Balan qabsi: Tel. 089 334041

Degelka: die-arche.de/

Khadka qabatinka maandooriyaha – talosiinta taleefanka ee dhibaatooyinka balwadda

Talo bixin ku saabsan balwadda, sida balwadda aalkolada. Kuwa loogu talagalay iyo qoysaskoodaba af Jarmal, Ingiriis, Faransiis, Isbaanish iyo Talyaani. Talada taleefanka ama emaylka.

Tel. 089 282822

E-Mail: kontakt@suchthotline.info.

Degelka: suchthotline.info

BZgA – La talinta taleefanka ee caafimaadka maskaxda

Talo bixin bilaash ah oo ku saabsan dhibaatooyinka caafimaadka maskaxda, Isniinta ilaa Khamiista, 10 subaxnimo ilaa 10 fiidnimo Jimcaha ilaa Axada 10 subaxnimo ilaa 6 galabnimo. Tel. 0800 2322783

Degelka: infektionsschutz.de/coronavirus/psychische-gesundheit.html

Dadka xanuunsan iyo kuwa cudurka qaba

Ma ku hubisay cudurka cusub ee 'Caabuqa-Corona' (SARS-CoV-2) baaritaanka- PCR, mase kugu dhacay safmarenka COVID-19?

Dhambaalka aad ka helayo magaalada München. Wareegtada guud, warqada macluumaaadka iyo foomka gelinta xogta.

www.mimi.bayern/index.php/muenchen-corona-alltag#flyout1

Dadka xiriirka dhow la leh qofka qaba cudurka iyo kuwa jiran

Ma la leedahay xiriir dhow mase jiraax xubin ka mid ah qoyskaaga oo cudurku ku dhacay (Caabuqa-Corona SARS-CoV-2) ama u jxanuunsan (COVID-19)? Dhambaalka aad ka helayo magaalada München. Wareegtada guud, warqada macluumaaadka iyo foomka gelinta xogta.

www.mimi.bayern/index.php/muenchen-corona-alltag#flyout2

Impressum

Herausgeber*in:

Ethno-Medizinisches Zentrum e. V.
MiMi Zentrum für Integration in Bayern
80337 München
E-Mail: bayern@mimi.eu

im Auftrag von:

Landeshauptstadt München
Gesundheitsreferat
80335 München
E-Mail: gvo4.rgu@muenchen.de

Stand: 06.09.2021 | Version 014

Layout: eindruck.net, 30175 Hannover

Titelbild: peterschreiber.media/stock.adobe.com

Online: muenchen.corona-mehrsprachig.de

Sprachen: Verfügbar in verschiedenen Sprachen

URL-Verweise: Für Inhalte externer Seiten, auf die hier verwiesen wird, ist der jeweilige Anbieter verantwortlich.

Quellen: Gesundheitsreferat der Landeshauptstadt München, Bayerisches Staatsministerium für Gesundheit und Pflege, BMG, RKI, BZgA, KVB, StMUK, StMI, StMAS, StMWI, Covid Alliance

Übersetzungen: Dolmetscherdienst
Ethno-Medizinisches Zentrum e. V.

Presseanfragen:

Pressestelle Gesundheitsreferat München
presse.gsr@muenchen.de

Anfragen MiMi Bayern
bayern@mimi.eu
www.mimi.bayern

V.i.S.d.P.: Ethno-Medizinisches Zentrum e. V.



Landeshauptstadt
München

Unterstützt von:

